

Fältgruppen



Anaga hadaan nahay Fältgruppen waxaan qayb ka nahay shaqada ka hortega ee degmada Växjö. Waxaan ku leenahay Växjö oo dhan goobo shaqo oo lagaga war hayo dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 12–25 sano. Sida badan waxaad nagu arki kartaa dugsiyada, goobaha waqti lumiska, suuqa ama meelo kale oo aan dad waaweyne joogin. Kaalinteenu waxa weeyi in aan sugno amniga iyo in aan gacan siino marka dhalinyaradu ubaahan yihiin taageero ama in wax laga caawiyo. Anaga waxaad nagala hadli kartaa dibaato yar ama mid weyn. Waxay ku saabsanaan kartaa dugsiga, asxaabta, xiriirka, ama isqabsiga waalidka. Waxa kale oo dhaca in dhallinyaradu na soo wacaan marka ay xafladuhu faraha ka baxaan (överstyr) ama waalidku na soo waco si uu u helo talo iyo tusaale khuseeya dhallinyarada.

Warbixin ku socda waalidiinta oo ku saabsan xaflada soo dhaweynta Guga.

Maanta waxaan arki karnaa in isticmaalka khamriga ee dhalinyaradu ay hoos u dhacdayso, in kasta oo xafledda soo dhaweynta gugu (valborg) ay tahay iid oo markaa dhallinyaro badani cabbaan khamrada. Dhallinyaradu caadi ahaan waxay u cabbaan si ay u sakhraamaan, sidaas darteed dhallinyaradu waxay aadaan xafladaha dhalinyada oo mararka qaarkood xaaladu faraha ka baxdo. Hadaanu nahay kooxda Fältgruppen waxaan jeclaan lahayn inaan waalid ahaan ku siino talooyin aad ka fekirto ka hor xaflada soo dhawaynta guga ee Valborg.

Talooyin kugu socda waalidka:

- **Ha iibsani!** "Qaar ka mid ah dadka waaweyn waxay rumaysan yihiin inay si fiican uga warqabaan waxa dhallinyaradu cabaan haddii ay wax iibsadaan. Dooddu sida caadiga ah waxa weeyi "waxaa fiican in ay cabbaan sharaabka tufaaxa (Cider) ee ay iibsadeen intii ay khamri meel kale ka heli lahaayeen". Hase yeeshee, waxa suurto gala in dhallinyaradu aanay ku qanacsanayn sharaabka tufaaxa (Cider) markaa dhallinyaradu caadi ahaan waxay u cabbaan si ay u sakhraamaan.
- **Kala hadal dhallinyaradaada** – Ku dhiiro in aad dhallintaada kala hadasho khamriga oo aad u caddeeyso mawqifka aad ka taagan tahay. Dhallinyarada ay waalidiintoodu meel adag iska taagaan khamriga wax yar ayey ka cabbaan khamriga.
- **La xiriirka** - Haddii dhallinyaradu ay ka qayb galayaan xaflad, balan samaysta si aad u xiriirtaan inta fiidka lagu jiro. Fadlan u sheeg in aad halkaa u joogto si aad u kaalmayso hadii lacala wax dhacaan.
- **La hadal waalidiinta kale** - Haddii dhallinyaradu aadayaan xaflad, fadlan la hadal waalidiinta kale ee dhallinyaradooda halkaas u socdaan. Intaa waxaa dheer, waxaad la hadli kartaa waalidiinta dhallinyaradoodu xaflada leeyihiin si aad u ogaato meesha aad ka wacayso haddii aad u baahatid inaad la xiriirto dhallinyaradaada.
- **La kulma ama soo qaad** - Hubso in dhallinyaradu ay leeyihiin qorshe ku saabsan sida ay guriga ku iman lahayeen. Qaar dhalinta ka mid ah waxay u arkaan inay tahay wax laga xishoodo marka waalidku soo kaxeeyo, laakiin maxay talo ahaan u soo jeedin karaan in laga soo qaado meel xaflada ka yara durugsan.

Kooxda Fältgruppen waxay ka shaqaysaa habeenka soo dhawaynta guga ee Valborg ilaa labda habeen nimo (02:00). Haddii aad ka walwalsan tahay in xaflada dhallinyartaada ay la fogaato ama aad su'aalo qabto ku saabsan dhallinyarada fadlan naga soo wac:

Grupnummer: 0470-417 60

Osama: 0470-43056

Edin: 0470-43252

Alexandra: 0470-796645